

Talaalka Rabies-ka

Talaalka Rabies-ku wuxuu dadka ka ilaaliyaa rabies in ay qaadaan ka dib marka uu xayawaan qaba cudurka rabies-ku uu leefo, qaniino ama xagto.

Waa maxay rabies-ku?

Rabiesku waa cudur aad u halis ah. Wuu dili karaa qofka aan laga dawayn marka uu la kulmo xayawaan qaba rabies. Cudur-kani wuxuu keeni karaa waalasho, neef ku dheg iyo suuxdimmo. Calaamadahani laga-yaabaa in aanay muuqan laba toddobaad ilaa siddeed toddobaad Mudadaa gudaheed, dawo ma laha qof-kuna wuu dhimanayaa.

Talaalka rabies-ku ma kaa difaaci karaa rabies?

Haa. Talaalku wuu kaa difaacayaa haddii aad qaadatay irbadihii oo dhan. Sida caadiga ah shan irbadood ayaa la isa siiyaa muddo bil gudaheeda. Irbadahan waxa la iskaga mudaa cududa.

Yaa u baahan in talaalkan rabies-ka la siiyo?

Qof kasta oo xayawaan qaba cudurka rabies-ku uu qaniinay, xagtay ama meel nabar hore u ahayd ka leefay.

Goorma ayaa la isa siiyaa talaalkan rabies-ka?

Talaalkan waa in la siiyo qofkasta oo wax ka gaadheen xayawaan qaba rabies sida ugu dhakhsaha badan. Dumarka uurka leh iyo caruurtana waa la siin karaa haddii ay u baahdaan.

Talaalkan rabies-ku ma yahay mid aan wax lagu noqonayn?

Haa. Dadka qaar ayaa meesha laga muday barartaa, casaataa ama cuncuntaa oo yara damqataa muddo dhowr maalmood ah. Dad tiro yar ayaa madaxa, caloosha iyo muruqyadu xanuunaan oo cuntada niyad u waaya iyaga oo noqda siddii wax wareersan. Dhibaatooyin xun-xun inta lagala kulmaa aad ayay u yartahay. **Waa inaad had iyo goor dhakhtarkaaga ka waraysato dhibaatooyinka iyo faa'iidooyinka talaalkasta.**

Goorma ayaan dhakhtarkayga la hadlaa?

La hadal dhakhtarkaaga haddii saddex bilood gudahood talaalka kadib astaamahani soo baxaan:

- caaro
- matag
- xumad badan
- suuxdimmo
- ama dhibaatooyin kale oo khatar ah aad ku aragto.

Yaa laga daayaa talaalka rabies-ka?

Talaalkan waa in la siiyo qofkasta oo looga baqanayo inay qaadaan rabies.

Yaan la xidhiidhaa haddii aan su'aalo kale ka qabo talaalka ?

Wixii faah-faahin dheeraad ah la xidhiidh dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaad ee kuugu dhow.

Diiwaan gelinta talaalada

Kadib marka ilmahaaga ama adiga lagu talaalo, hubi in dhakhtarku "kaadhka jaalaha ah" ku diiwaan geliyo talaalka. Diiwaankaagan meel adag dhig!